

Dhismaha xafiiska Garajaaanka

Jum. 2. ee Dowlada


FAAFINTA

RASMIGA AH 31/3/99

xeer sharci 27: mwd/apl

#18ka 11/99

الرسمية



الجريدة

DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND SOOMAALIYA

لولاية أرض بونت الصومال

Sannadka Iaad Garoowe 1 Sebtembar 1999 L.9

FAAFINTA BILWALBA KA SOO BAXDA

جريدة الشهرية

Qaybta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawlad Goboleedka Puntland Soomaaliya

Qiimaha: waa Sh. So 10.000 lambar walba. Rukunka Sannadkii waa Sh. So 170.000 dalka gudihisa, dibeddana waa ShSo 500.000 Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilowdaa 1da Janaayo. Qiimaha qoritaanka F.R. halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh. So 3.000. Rukunka iyo Qoritaanka waxaa la weydiistaa Qaybta Maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha berriga ee Wasaaradda Maaliyadda.

TUSMADA Qeybta Koowaad

SHARCI

- ✓ Sharci Lam. 1 ee 31.03.199, "Nidaamka Xukuumadda iyo Hay'addahalaxiriirsan" Bogga 2
- ✓ Sharci Lam. 2 ee 14/4/1999 "Nidaamka Garsoorka" Bogga 10

Qeybta Labaad

XEER

- ☞ Xeer - Hoosaadka Golaha Wakiilada Puntland Bogga 15
- ☞ Xeer Madaxweyne Lam. 1 ee 16 Agoosto 1998 dhismaha Wasaaradaha Dowladda Puntland iyo magacaabidda Wasiirada dowladda Bogga 24



DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

PUNTLAND STATE OF
SOMALIA

Xafiiska Madaxweynaha

Office of the President

Xeer-Sharci Lam. MW/DPS/11/99
Dhismaha Xafiiska Garyaqaanka Guud Ee Dawladda

M ADAXWEYNAHA DAWLADDA PUNTLAND

MARKUU ARKAY: Axdiga Dawladda Puntland qod.13.2;

MARKUU ARKAY: Go'aanka ka soo baxay Golaha Wasiirada fadhigiisi 25ka Febraayo 1999;

MARKUU TIXGELIYEEY: Baahida loo qabo dhisidda Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda oo u xilsaaran talabixinta sharciga iyo qawaaninta, kaydinta nuqullada asalka, faafinta qawaaniinta cusub, difaaca danaha Dawladda: Maxkamadaha idaariga ah iyo kuwa madaniga ah hortooda;

MARKUU GARAWSADAY: lagama maarmaanimada in loo sugo Xafiiska Garyaqaanka Guud madax-banaani shaqo, ahmiyadda uu leeyahay awgeed, laguna xiro hay'adda u sarreysa qaabka dhismaha Dawladda;

WUXUU SOO SAARAY:

Xeer-Sharciga soo socda;

Qod. 1aad

1. Marka bilaabo 25ka Febraayo 1999ka, waxaa la dhisay Xafiiska Garayaqaanka Guud ee Dawladda Puntland.
2. Xafiiska Garyaqaanka Guud waa hay'ad gaar ah oo leh madax-banaani shaqo, lana xiriirsan Madaxtooyada Dawladda Puntland.

Qod. 2aad

Hawlaha Xafiiska Garyaqaanka Guud waxaa ka mid ah:-

- a) Talo-bixinta Sharciga iyo qawaaniinta marka ay soo weydiistaan hay'adaha iyo laamaha Dawladda

- b) Isku dubarididda, abaabulyada mashruucyada xeer-sharci iyo xeerarka loo gudbinaayo Golaha Wakiilada ama Golaha Xukuumada
- c) Kaydinta nuqullada asalka ah ee sharciyada iyo xeerarka ka soo dhammaada hay'adaha xeer-dejinta
- d) Ku soo saaridda sharciyada iyo xeerarka cusub faafinta rasmiga ah
- e) Difaacidda danaha Dawladda, hay'adaheeda iyo laamaheeda maxkamadaha idaariga ah iyo kuwa madaniga ah hortooda
- f) Fulinta waajibaadka iyo hawlihii kale ee sharci ama xeer kale uu u xilsaarayo Xafiiska Garyaqaanka Guud
- g) Abaabulida iyo soo saaridda faafinta rasmiga ah ee Dawladda, taasoo lagu dhisi-doono sharci gaar ah.

Qod. 3aad

Xafiiska Garyaqaanka Guud dhisme ahaan wuxuu ka kooban yahay:

- a) Garyaqaanka Guud ee Dawladda oo Madaxa Xafiiska ah.
- b) Ku-Xiggeenno Garyaqaanka Guud, ama
- c) Waaxyo
- d) Qaybta Faafinta Rasmiga ah, iyo
- e) Xogheynta

Qod. 4aad

1. Garyaqaanka Guud ee Dawladda waa mas'uulka u sareeya maamulka Xafiiska, wuxuuna u xilsaaran yahay isagoo ka adeejinaaya hawl-wadeennada ka tirsan iyo imkaamiyaadka Xafiiska fulinta waajibaadka ku xusan qod. 2aad ee sharcigaan iyo soo jeedinta: magacaabidda, bedelka, dallacaadda, anshaxa iyo abaalmarinta K/xiggeenada, Madaxda Waaxyaha iyo Hawl-wadeennada kale.
2. K/Xiggeenadda Garyaqaanka waxay fuliyaan xilalka hadba Garyaqaan Guud u wakiisho ee aan ka baxsanayn waajibaadka Xafiiska.
3. Xilalka Waaxyaha, Qeybta Faafinta Rasmiga ah iyo Xogheynta waxaa lagu kala qeexi doonaa Xeer-hoosaadka Xafiiska loo sameyn doono.
4. Hawl-wadeennada Garyaqaanada ah ee Xafiiska Garyaqaanka Guud waxay leeyihiin xasanadda (immunity) Garsoorayaalka oo kale.


Qod. 5aad

Waxaa loo samayndoonaa Xafiiska Garyaqaanka Guud xeer-nidaamiye u gaar ah.

Qod. 6aad

Xeer-sharcigaanu wuxuu dhaqan-galayaa 25ka Febraayo 1999, waxaana loo gudbinayaa Golaha Wakiilada si sharci loog rogo, waxaana lagu soo saarayaa faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

Garoowe, Maarso 6, 1999;


 Cabdullaahi Yuusuf Axmed
 Madaxweynaha Dawladda

